

Diididda Siidaynta Keydka Diiwaanka Macluumaadka

Diiwaanka Macluumaadka waa mid bulsho oo la gudbin karo iyada oo aan la weydiinin shakhsiga macluumaadkaasi leh. Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay diiwaanka macluumaadka ah u aqoonsan yihiin kuwa soo socda: Magaca, Taariikhda Dhalashada, Fasalka, Iskuulka, Tariikhda uu ardaygu ku soo biirey iskuulka, abaal-marinnada ardayga la gudoonsiiyay oo aay kamid tahay qalin-jabin ama shahaado dugsi sare hadii uu helay iyo macluumaadka ku saabsan howlaha manhajka dhaafsan.

Ujeedada Diiwaanka Macluumaadku waa in ay Iskuullada degmada Saint Paul ay u suurto gasho in ay macluumaadkaasi ku soo daabici karaan buug-sanadeedka, diiwaan sharafeedka iyo liisaska kale ee ardayda lagu aqoonsado/ictiraaf, barmaamijyada qalin-jabinta iyo kuwa ciyaaraha iwm.

Marka laga soo tago macluumaadka ku jira liiska sare, hoos waxaa ku xusan macluumaad loo qoondeeyay in ay ka mid noqdaan kuwa

diiwaanka shakhsiyadka hoos ku cad:

	Cinwaanka	Telefoonka Guriga	Nambarka aqoonsiga ee ardayga	Nambarka ID-ga gobalka	Jinsiyada ardayga	Cinwaanka Emailka ee ardayga	Magaca Waalidka/ Masuulka	Jadwalka Fasalka
Kuwa militiriga ka diiwaan-galiya ardayda dhigata iskuullada sare	X	X				X		
Maktabadaha Bulshada ee gobolka Minnesota	X	X	X			X		
Shaqaalaha ilaha ee Iskuullada	X	X					X	X
Baska gobalka			X					
Xafiiska waxbarashada sare ee Minnesota				X	X			

Foomamka waa in dib loo soo celiyaa ugu dambayn 30-ka bisha Sibteembar ama 30 cisho ka dib markii Diiwaanka Ardayda iyo Xuquuqaahaaga lagu soo daabaco barta spps.org hadba labadaasi xiliyood kii dambeeya. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan wac qeybta diiwaannada ardayda oo uu telefoonkoodu yahay 651-632-3764.

Calaamadee macluumaadka hoos ku xusan kuwa aadan rabin in la gudbiyo:

- | | |
|--|---|
| <input type="checkbox"/> Magaca | <input type="checkbox"/> Macluumaadka howlaha minhajka dhaafsan |
| <input type="checkbox"/> Taariikhda Dhalashada | <input type="checkbox"/> Macluumaadka loo gudbiyo kuwa militiriga ardayda ka diiwaan-galiya |
| <input type="checkbox"/> Fasalka | <input type="checkbox"/> Macluumaadka loo gudbiyo maktabadaha bulshada ee Minnesota |
| <input type="checkbox"/> Iskuulka | <input type="checkbox"/> Macluumaadka la siiyo shaqaalaha ilaha ee iskuullada |
| <input type="checkbox"/> Taariikhda uu ardayga iskuulka bilaabay | <input type="checkbox"/> Warbixinta basaska magalaada |
| <input type="checkbox"/> Abaal-marinnada sida qalinjabin ama shahaado dugsi sare | <input type="checkbox"/> Warbixinta xafiiska warbarashada sarre |

Waan ogahay in saxiixayga foomkan uu ka dhigan yahay in macluumaadka cunugayga aanan lagu soo dareynin daabacaadyada buug-sanadeedka, diiwaan sharafeedka iyo liisaska kale ee ardayda lagu aqoonsado/ictiraaf, ogaysiisyada barmaamijyada sida kuwa ku saabsan (tiyaatarrada, qalin-jabinta, ciyaaraha), war saxaafadeedyada ku saabsan guulaha ay iskuullada ka soo hoyiyaan ciyaaraha, wargeysyada iskuullada, ban-dhigyada bulshada, daabacaadyada baraha ay iskuullada ansixiyeen iyo ka qeybqaadashada howlaha iyo xafadaha iskuulka ku saabsan.

Waxaan sidoo kale fahamsanahay diiditaanka gudbinta iyo wadaaga macluumaadka in uu dhaqan galaayo ilaa iyo inta dib u badalid lagu sameynaayo, qoraal ahaan lagu badeleyo ama uu ardaygu iskuulka ka wareegayo.

Magaca Ardayga: _____

Taariikhda: _____

Iskuulka: _____

Fasalka: _____

Magaca Waalidka (qor): _____

Lamabrka Ardayga #: _____

Magaca Waalidka (ama ardayga qaan gaaray)

Taariikhda

**Fadlan foomkan ku soo celi qeybta Diiwaanka Ardayda ee ku taalla Xarunta Meeleynta Ardayda
2102 University Avenue West
Saint Paul, MN 55114**